Tijaabada (Baaritaanka) maqaarka ee Cudurka Qaaxada

Developed by the
Minnesota Department of Health,
Tuberculosis Prevention and Control Program
August 2002 phone: (612) 676-5414

This is one in a series of four patient education pamphlets that addresses TB to be used in various clinical situations.

Mantoux Skin Test for Tuberculosis, Somali

Jeermiska iyo cudurka qaaxada

TBda waa looga daaweyn karaa daawo

Qaaxada waa cudur khatar ah oo uu keeno jeermis ku tarma jirka waxyeelayana xubnaha (tissue). Inta badana wuxuu waxyeeleeyaa sambabada. Qaaxada waxay ku fidaa in qof qof kale ugu gudbiyo hawada. Qaaxadu waxaa lagu daaweyn karaa daawo.

Calaamadaha iyo noocyada **cudurka qaaxada** waxaa ka mid ah:

- qufac badan
- xaako adag oo aad qufacdo
- dhiig aad qufacdo
- xabadka oo ku xanuuna marka aad qufacdo
- miisaankaaga oo hoos u dhaco
- qandho
- habeenkii oo aad u dhidido
- meesha cudurka hayo oo ku xanuunta

Marka ruux qaba sambabada qaaxada uu qufaco, hindiso amaba qayliyo, jeermiska qaaxada wuxuu ku fidaa hawada. Dadka kalana waxa ay ku neefsanayaan sambabadooda hawadii jeermiska laheyd. Waana tan lagu magacaabo TB infection ama jeermiska qaaxada.

Qofka qaba **jeermiska qaaxada:**

- ma qaba calaamadaha qaaxada
- ma dareemayo xanuun
- ma u gudbin karaayo jeermiska dadka kale

Jeermiska qaaxada waxaa uu ku noolaan karayaa jirka sanado badan asaga oo wax xanuun ah keenin. Haddii qofkii qaba jeermiska cudurka qaaxada keena aan laga daweyn cudurka, waxaa ku dhici karaya cudurka qaaxada. Ka dibna jeermiska qaaxada wuxuu u gudbi karayaa dadka kale.

Waxaad qaadi kartaa jeermiska qaaxada haddii aad u dhawaatid qof qaba jeermiska cudurka qaaxada keena (xataa haddii aadan ogeyn iney qabaan cudurka qaaxada). Dadka ma ogaan karayaan in ay qabaan jeermiska cudurka qaaxada keena iyo in kale ilaa in la baaro mooye.

Tijaabada (Baaritaanka) maqaarka Qaaxada

Tijaabada maqaarka (Mantoux) waxay sheegi kartaa in aad qabtid jeermiska qaaxada

Tijaabada (baaritaanka) maqaarka ee loo yaqaan (Mantoux skin test) waa habka ugu wanaagsan ee lagu sheegi karo haddii aad qabto jeermiska cudurka qaaxada keena. baaritaanka waxaa inta badan lagu sameeyaa gacanta. Irbad yar oo wadata dhacaan (loo yaqaan tuberkuliin) ayaa waxaa lagu duri dhudhunka maqaarka.

Waa ay barartaa ama ay casaataa. Waa in aad aragtaa dhakhtarkaaga labo ila saddex maalmood gudahood si uu u go'aansado in aad jeermiska qaaxada qabto iyo in kale. Waxaa laga yaabaa in mar kale baaritaan lagugu sameeyo si loo xaqiijiyo. Taa ayaa waxaa loo yaqaan baaritaanka jeermiska cudurka qaaxada keena.

Xitaa haddii aad horay u qabtay talaalka ka hortaga qaaxada ee (BCG) waad qaadan kartaa tijaabada maqaarka (skin test). BCG-du iyo tan tijaabada maqaarrka wax fal gal ah kama dhex dhaco, kana difaaci kari mayso qaaxada. Haddii uu tijaabada maqaarka muujiso in aad qabto jeermiska cudurka qaaxada keena, ama aad qabto calaamadaha cudurka qaaxada, waxaa lagugu sameyn raajada feeraha si loo hubiyo in sambabadaadu uu waxyeeleyey jeermiska qaaxada. Baritaano kale ayaa laga yaaba in loo baahdo si loo go'aansado in aad daawo u baahan tahay iyo in kale.

Daaweynta jeermiska cudurka qaaxada keena

Waxaa laga yaabaa in laguugu taliyo in aad qaadato **daawo ka hortagta koboca jeermiska cudurka qaaxada keena**. Daawada inta badan waxaa laguugu talinayaa haddii aad:

- xiriir dhow la leedahay qof qaba cudurka qaaxada
- raajadaada feeraha ay muujiso in mar hore uu kugu dhacay cudurka qaaxada
- qabto dhibaaato caafimaad daro ee keeni karta khatarta cudurka qaaxada.

Daaweynta cudurka qaaxada

Waa lehelaa daawo lagu daweeyo cudurka qaaxada. **Cudurka qaaxadana waxaa lagu daweyn karaa adoo u qaata daawada sidii laguugu qoray.**